

Ma bixisay lacagta saxda ee qarashka xanaanada caruurta 2014?

Bixinta lacagta saxda ee qarashka xanaanada caruurta waa su'aal ku saabsan cadaaladda. Sidaa darteed ayaa degaanka Uddevalla u sameynayaa baaritaanka qarashka dugsiga xanaanada, meesha lagu hayo caruurta, guriga xiliga firaaqada iyo naadiga xiliga firaaqada ee la bixiyey sanadka 2014. Warbixinta aad adiga mas'uulka ka ah caruurta siisay degaanka ayaa waxa la barbar dhigaa daqliga reerka soo galay canshuurta kadib ee yaala xafiiska canshuurta. Baaritaanka qarashka ayaa hadda kadib la sameyn doonaa sanad kasta.

Ma waxaad bixisay wax yar mise wax badan?

Adiga ah mas'uulka caruurta ayaa mas'uul ka ah inaad bixiso warbixinta saxda ah ee daqliga iyo xaalka reerka si qarashka reerku bixiyo u noqdo sax. Haddii baaritaanka lagu ogaado in reerku bixiyey qarash qalada ee xanaanada caruurta, waxa la sameyn doonaa sixid. Haddii aad bixiseen qarash yar waxa la idiin soo diri doonaa warqad aad ku bixisaan lacagta la idinku leeyahay. Haddii aad bixiseen lacag badan waxa degaanku idiin soo celin doonaa lacagta saa'idka ah.



Su'aasha cadaalada

Waa su'aal cadaaladda quseysa in reeraha oo dhami loola dhaqmo si isku mida ayna bixiyaan qarashka marka loo eego qiimaha go'an ee saxda ah. Waxa kaloo muhim noo ah inaan bixiyo lacagta dhankeena soo jirta isla markaana helno tan dhankiina soo jirta.

Baaritaanka qarashka waxa la sameynayaa iyadoo la eegayo labadii sano ee la soo dhaafay maadaama warbixinta xafiiska canshuurta ee xiligaa wixi ka horeeyey aysan jirin.

Mas'uuliyiinta caruurta badankoodu waxey bixiyeen qarash saxa oo tani ma saameyn doonto.

Goormuu dhici doonaa kontoroolku?

Waxeynu soo diri doonaa lacagta dhankeena soo jirta iyo warqadda lagu bixinayo lacagta ee sanadka 2014 xagaaga 2016 dhexdeeda. Baaritaanka ayaa hadda wixi ka danbeeya dhici doono sanad kasta.

Warbixin & su'aalo

Warbixin intaa dheer iyo su'aalaha iyo jawaabaha caadiga ah waxad ka heleysaa boggeena internetka www.uddevalla.se/avgiftskontroll

Waxad kaloo caawimaad ka heli kartaa avgiftskontroll@uddevalla.se

